

# SOOMAALIYA

## MIISAANIYADDA MUWAADINIINTA 2025

DULMAR FUDUD OO KU SAABSAN SOOMAALIYA
MIISAANIYADDA DOWLADDA FEDERAALKA

# Tusmada


| | |
|---|---|
| Weedha Wasiirka | 3 |
| Horudhac: | 5 |
| Abaabulka Kheyraadka (2025) | 6 |
| Qoondada Kheyraadka (2025) | 6 |
| 2024 Dib Ugeegis | 7 |
| Isbarbardhigga Miisaaniyadaha 2024 and 2025 | 8 |
| Istaraatiijiyadda Kobaca | 10 |
| Mashaariicda Kale ee Hormarineed ee saaxiibada ee loo qorsheeyey 2025 | 15 |

# Erayga Wasiirka:

Waxaa sharaf iyo rajo weyn ii ah in aan soo bandhigo Miisaaniyadda Muwaadiniinta ee Sannad-maaliyadeedka 2025. Dukumentigani waxa uu ka tarjumayaa sida ay Dowladda Federaalka Soomaaliya uga go'an tahay hufnaan, isla xisaabtan, iyo maamul loo dhan yahay.

Sanadihii la soo dhaafay, Soomaaliya waxay ku tallaabsatay horumarro la taaban karo oo ku aaddan soo kabashada dhaqaalaha, dib u habeynta hay'adaha dowladda, iyo horumarinta bulshada. Miisaaniyadda 2025-ka waxay ku dhisan tahay guulahaas si wax looga qabto rabitaanka dhammaan dadka Soomaaliyeed ee ah mustaqbal barwaaqo iyo xasillooni. Miisaaniyadda Muwaadiniinta ayaa fududaynays

Xog maaliyadeed oo adag oo loo sameeyay qaab uu heli karo qof kasta oo Soomaali ah. Diiraddu sanadkan waa kobcinta kobaca dhaqaalaha, horumarinta amniga, iyo maalgashiga qeybaha muhiimka ah sida waxbarashada, caafimaadka, iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Marka aan mudnaanta siino meelahaas, waxaan hiigsaneynaa inaan abuurno shaqo, hagaajinno heerka nolosha, iyo xoojinta adkeysiga qarankeena.

Waxaan aqoonsannahay doorka muhiimka ah ee ay muwaadiniintu ka ciyaaraan xaqiijinta isla xisaabtanka isticmaalka hantida dadweynaha. Miisaaniyadani waxa ay ka turjumaysaa aragtideena iyo go'aan qaadashada aynu kaga wada shaqayno horumarka qarankeena. Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan dadka Soomaaliyeed inay ka qayb qaataan dukumeentigan oo ay si firfircoon uga qayb qaataan safarkayaga ku aaddan horumar waara.

**Hon. H.E. Iiman Biixi Igeh, Wasiirka Maaliyadda JFS**

# Eray-Koob:

**La-Xisaabtan:** Waajibka dowladda ee ah in ay sharaxdo sida kheyraadka loo isticmaalo oo ay mas'uuliyad iska saarto natiijooyinka.

**Miisaaniyad:** Qorshe maaliyadeed oo muujinaya sida ay dawladdu lacag u ururinayso una kharash gareyn doonto muddo cayiman, badiyaa hal sano.

**Abaabulka** Dakhliga Gudaha: Lacag ururinta gudaha cashuuraha iyo khidmadaha si loo dhimo ku tiirsanaanta gargaarka shisheeye

**Kharash:** Wadarta lacagta ay dawladdu ku bixiso dhinacyada sida caafimaadka, waxbarashada, iyo amniga.

**GDP (Gross Domestic Product):** Wadarta qiimaha dhammaan badeecadaha iyo adeegyada dalka gudihiisa laga soo saaro sannadkii

**Deeq:** Lacagaha aan dib loo bixin ee la bixiyo si loogu taageero barnaamijyada ama baahiyaha gaarka ah ee dawladda.

**HIPC (Wadamada Faqiirka ah ee deymaha badan qaba):** Waa hindise caalami ah oo lagu caawinayo waddamada ugu saboolsan adduunka in ay dhimaan culayska deynta.

**Maalgelinta Raasamaal ee Aadanaha:** Kharashka waxbarashada, caafimaadka, iyo xirfadaha si kor loogu qaado wax soo saarka dadka iyo bed-qabka.

**Sicir bararka:** Heerka ay ku kacayaan qiimaha badeecadaha iyo adeegyada, hoos u dhaca awoodda wax iibsiga.

**Hantida guud:** Lacagaha iyo hantida ay dowladdu maamusho oo loo isticmaalo in loogu adeego muwaadiniinta Soomaaliyeed.

**Dakhliga:** Dakhliga ay dawladdu ka hesho cashuuraha, khidmadaha, iyo deeqaha lagu maalgeliyo adeegyada guud

**Qoondeynta Kheyraadka Istaraatiijiyadeed:** Si hufan oo miisaaniyada loogu isticmaalo mudnaanta qaranka sida amniga iyo adeegyada.


**Daah-furnaan:** Wadaag furan oo miisaaniyadda iyo macluumaadka siyaasadda si loo dhiso kalsoonida dadweynaha.

# Horudhac:

Miisaaniyadda Muwaadiniinta ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waa hage la fududeeyay oo kor u qaadaya hufnaanta iyadoo si cad loo wadaagayo sida hantida guud-sida canshuuraha iyo lacagaha deeq-bixiyayaasha- loo ururiyo loogana faa'iideeyo muwaadiniinta. In kasta oo ay jiraan caqabado socda sida nabadgelyo-xumada iyo saameynta cimilada, Soomaaliya waxa ay horumar ka samaysay dib-u-dhiska dhaqaalaheeda iyo hey'adaha dawladda. Miisaaniyadda 2025-ka waxay xoogga saareysaa kobaca loo dhan yahay iyada oo loo marayo qoondeynta kheyraadka istaraatiijiga ah ee meelaha muhiimka ah sida amniga, kaabayaasha iyo maalgashiga raasamaal ee dadka—macnaheedu waa wanaajinta kharashka waxbarashada, caafimaadka iyo xirfadaha. Waxa kale oo ay muujinaysaa muhiimadda abaabulidda dakhliga gudaha ama kordhinta dakhliga laga helo ilaha maxaliga ah sida canshuuraha, si loo yareeyo ku tiirsanaanta gargaarka dibadda. Iyadoo kobcinaysa isla xisaabtanka iyo ka qeybgalka dadweynaha, dawladdu waxay higsanaysaa inay hubiso in qof kasta oo Soomaali ah la wargaliyo lagana qeybgaliyo ka faa'iideysiga horumarka qaranka.

**Wadarta kharashaadka miisaaniyadda**

**$1.36 Bilyan**




Dakhliga halka uu ka yimid

**$430.3M** Dakhliga gudaha | **$903M** Kaalmada deeq-bixiyaasha

# Abaabulka kheyraadka ee Soomaaliya (2025)

**Dowladda Soomaaliya waxay aruurin rabtaa**

**$1.33B**

**Xisaabta dakhliga iyo deeqaha 2025, tano oo ah qiyaasti 9.85% GDP hoos u dhaca dakhliga sida hoos ku xusan:**

**Dakhliga gudaha:**
**$430.3M**
(3.18% of GDP) waxaa lagu dari doonaa canshuuraha gudaha

**Deeq-bixiyaasha:**
**$903M**
(6.67% of GDP) deeq-bixiyaasha ayaa ku kordhin doono

### Qeybo muhiim ah oo dhaqan geli kara

- In la dhaqan geliyo sharciga canshuurahadakhliga sannadkan dhexdiisa-2025.
- Dakhliga aan canshuur lahayn oo digital laga dhigo

# Kheyraadka qoondeyntiisa (2025)

## Kheyraadka qoondeyntiisa oo kooban 2025

Sannadkan 2025 ayaa dowladda Soomaaliya waxay qorsheyneysaa in ay meel u dhigtolacag dhan 1.36Bilyan , tani oo ah 10.03% GDP wasaaradaha kala duwan si loo hormariyo mashaariicda mudnaanta ee qaranka. Qoondeyntaas ayaa wax looga qaban doonaa mashaariicda muhiimka ah sida amniga,waxbarashada, dhaqaalaha, xasilloonida, horumarka, bixinta adeegga bulshada iyo daryeelka bulshada .















# 2024 Eegis kooban

## Tirakoobka dhaqaalaha 2024

Dhaqaalaha wuxuu jaangooyaa nolol maalmeedka , sida shaqooyinka, beeca iyo adeegga guud. Qeybtan waxay sawir gaaban ka bixineysaa isbeddellada laga bilaabo 2024 oo ay kamid tahay kobaca, sicir-bararka iyo ganacsiga.

**Kobaca GDP ee saxda ah:**

2024 — 3.7%

2023 — 2.8%

Tani waxaa ka danbeeyo dhismo, kabashada abaaraha, beeraha,isticmaalka xawaaladaha.

**Sicir-bararka**

2024 — 4.1%

2023 — 5.7%

**Ganacsi**

2024 — $1.02 billion

2023 — $859 million

Dhofinta

**Ganacsi**

2024 — $7.6 billion

2023 — $7 billion

Sodejinta


**Deynta dadweynaha:**

2024 — 18.1% of GDP

2023 — 64% of GDP

kadib HIPC

## 2024 Dakhliga iyo kharashka waxqabadkiisa




**Dakhli:**

**$950.5 M**
Wadarta dakhliga iyo deeqaha (7.61% of GDP)

in ka yar **$1.05B**
Yareynta deeqaha dibedda

Soomaaliya waxay ka heli jirtaycanshuur iyo ilo kale ka badan wixii la filyay
**$11.6M**
totalling $357.8 million.

**Kharashaadka**

**$935.8M**
Total spending (7.49% of GDP)

**13.3%** Deeq bixiyaasha oo hoos u dhacan intii la filayay

**Dheelitirka miisaaniyadda:**

**$14.7M**
Dheeraad oo ka dhigan

## 2025 Miisaaniyadda oo la soo koobay

- **Xasilloonida dhaqaale waxaa laga hormarinayaa Amniga**
- **Hirgelinta barnaamij ku saleysan miisaaniyadda iyo qorshayaasha istiraatiijiyadeed ee MDAs**
- **Kobcinta SMEs si loo helo dhaqaalaha iyo taageerada ganacsiga dhexe**
- **In la maalgeliyo kaabayaasha dhaqaalaha sida caafimaadka iyo waxbarashada**
- **Wanaajinta isku furka ganacsiga gobolka.**

# Isbarbardhig Miisaaniyadda 2024 iyo 2025

Miisaaniyadda guud ee dowladda Soomaaliya ee sannadka 2025 ayaa kor waxay u kacday 45% dhinaca kharashka marka loo fiiriyo sannadkii 2024 , iyadoo mudnaanta la saaray amniga, kaabayaasha dhaqaalaha iyo ilaalinta xuqquda bulshada guud. Dowladda Soomaaliya waxa ay hiigsaneysaa in ay kordhiso canshuuraha dakhliga gudaha ilaa 20% oo loo marayo in la habeeyo canshuuraha iyo tiknoolajiyada la xiriirta, dhinaca kale deeqaha kaalmada ay muhii, yihiin iyagoo dabooli kara 68% dakhliga guud. Kaabayaasha muhiimka ah sida waxbarashada, caafimaadka iyo beeraha waxaa la kordhiyay qoondadooda si loo dareemo korniinka qeybahaas. Deynta guud waxay aad hoos ugu dhacday HIPC kaddib, taas fursad u siisay in la helo kabasho dhaqaale oo jiri doono muddo dheer.

| Qeybta/Dabaqadda | 2024 | 2025 (horay loo dejiyay) | % Is-Beddel | Fiirada muhiimka ah |
|---|---|---|---|---|
| Kobaca GDP | 3.7% | 3.9% | 0.2% | Horumar kooban oo korriin ah qeybaha dhismaha, beeraha iyo isticmaalka guud |
| Sicir Bararka guud | 4.1% | <5% (targeted) | – | Sicir bararka waxaa la filayaa inuusan kor u kicin 2023 kaddib taas oo ku kooban 5.7% |
| Wadarta Dakhliga guud | $950.5 million | $1.33 billion | 39.9% | Korrimo yar oo lga wado kaabayaasha dhismaha, beeraha iyo isticmaalka guud ayaa jirto |
| Dakhliga Gudaha | $357.8 million | $430.3 million | 20.2% | Waxa soo baxay in dib u habeynta dakhliga iyo tiknoolajiyada aan canshuuraha ahayn |
| Dakhliga deeqbixiyaasha | $593 million | $903 million | 52.3% | Waxaa la filayaa in la buuxiyo waxa ka dhiman miisaaniyadda iyo la taageero horumarinta |
| Wadarta Kharashka guud | $935.6 million | $1.36 billion | 45.4% | Waxaa lagu dadaalayaa sidii wax looga qaban lahaa baahiyaha muhiimka ee kajira miisaaniyadda |
| Baaqiga Miisaaniyadda | $14.7 million Milyan Dheera | Dheeli-tirka isticmaalka keydka oo istiraatijiyo ku dhisan | – | 2024/2025 Baaqiga ayaa lagu maalgelin doonaa arrimaha muhiim ka ah |
| Deynta caamka ah (%GDP) | 18.1% (hoos min 64% sannad 2023) | Lagu koobo | – | Deyn cafinta kaddib HIPC ayey tusaale u tahay guusha la gaaray |

## Dulmar guud deynta caamka ah(Dadweynaha) (Ilaa June 2024)

Deynta caamka ah waxay dowr muhiim kaga jirtaa maalgelinta adeegyada aad loogu baahanyahay iyo horumarinta. Dadaallo badan oo socday sannado ayaa horumar laga gaaray deyn cafinta , Soomaaliya waxay xoogga saareysaa maareynta amaahdeeda waxaan la hubinaa markasta kobac waara inuu jiro. Qeybtan waxay ka tallaabeysaa deynta Soomaaliya waxaana la ogaanaa deynta yaa nagu leh waana meeqa

**Hay,adda lacagta adduunka (IMF):**

**$95.33M**

**Sanduuqa lacagta Carabta:**

**$304.41M**

**Wadarta deynta guud:**

**$2.25B**

**(18.1% of GDP)**

**MAREYKANKA:**

**$749.85M**

**Sanduuqa Kuwait:**

**$124.23M**

## Koobidda sannadak 2025 hiigsiga dhaqaalaha

**Koboca GDP ee saxda ah**

**3.9%**

**Sicir-bararka: Hoos**

**⬇ 5%**

**Koboca dhoofinta:**

**⬆ 18%**

# Kobaca Istiraatiijiyada

Ujeedada dowladda Soomaaliya waa in laga faa.iideysto kobaca istiraatiijiyada dhinaca siyaasadda maaliyadda. Kharashka canshuuraha si loo gaaro kobac dhaqaale oo waara,shaqo abuur, hoos u dhigidaa faqriga, dowladdu waxa ay diiradda saareysaa kobcinta ganacsiga jawi lagu ganacsan karo, kaabayaasha oo la hagaajiyo iyo tayeynta wax-tarka hay,adaha dhisan Tiirarka ugu muhiimsan ee kobaca istiraatiijiyada

**Tiirarka ugu muhiimsan Kobaca Istiraatiiyiyada**

- **Qeybaha Amniga kala hormarintiisa:** Nabadgelyada in ay tahay aasaaska kobaca dhaqaalaha waa in la aqoonsado, kaddib dowladda waxay u qoondeyn

- **Xoojinta hay,adaha dowladda:** In dib loo habeeyo maamulka guud iyo maamulka maaliyadda waxay kor u qaadaysaa hufnaanta iyo isla xisaabtanka, waxaa kor u kacayo kalsoonida dadweynaha iyo kalsoonida deeq-bixiyeyaasha

- **Kaabayaasha dhaqalaha oo la maalgeliyo:** Roads, Jidadaka, tamarta, iyo dib u dayactirka beeraha waxay muhiim u yihiin awood bixiyaal iyo kala dumwanaanshaha dhaqaale iyo in hoos loo dhigo faqriga.

- **Taageerada Dakhliga qoyska iyo SME-yada:** Fududeynta helitaanka maaliyadda MSMEs iyada oo loo marayo Bangiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliyeed iyo Shirkadda Gargaara. Awood-siinta ganacsiyada si ay uga faa'iideystaan fursadaha maxalliga ah iyo kuwa gobolka iyada oo loo marayo Rugta Rugtaa ganacsiga iyo warshadaha Soomaaliyeed.

- **Horumarinta Badda iyo beeraha:** In la maalgeliyo kaabayaasha beeraha waxay kor u qaadi wax soo saarka beeraha, sidoo kale kaabayaasha badda waxay kor ugu qaadi ilaalinta badda si loo xakameeyo sharci darrada kalluumeysiga, in la hubiyo isticmaalka kheyraadka badda si joogta ah oo hufan.

- **Horumarinta Xoogga Aadanaha:** Kordhinta maalgeshiga Waxbarashada iyo Daryeelka caafimaadka, waxaa la raacayaa qorshaha istiraatiijiyada si kor loogu qaado tayada nolosha iyo wax soo saarka guud.

- **Is-dhexgalka:** EAC In Soomaaliya ay xubin ka noqoto waxay fursado badan u fureysaa ballaarinta ganacsiga, Soomaaliya waxay siineysaa suuqyo aad u baaxad weyn iyo in ay kor u qaado tartanka ka jira gobolka.

## Muhimadda mudnaanta iyo isbedellada: 2025

**Amniga iyo Maamulka**

- Amniga iyo Maamulka ayaa hela qoondada ugu muhiimsan qiyaastii(18% + miisaainyadda)
- Maalingelinta sirdoonka horumarinta bulshada oo ku saleysa amni.

**Kobaca iyo kaabayaasha dhaqaalaha**

- Dhismaha waddooyinka muhiimka ah (Tusaale Dhuusamareeb-Qardho)
- Hammiga in la helo kobaca korontada(hadda 40%)
- Maaligelinta badda si looga hortago sharcidarrada kalluumeysiga waddanka hadda ka socdo.

**Waxbarashada iyo caafimaadka**

- Dhismaha fassallo oo ay maalgelisay hay,adda caalamiga ee waxbarashada
- Xarumaha caafimaadka daryeelka oo xoogga la saaro si loo helo tamarta qorraxda ka dhalato

**Kamid noqoshada bulshada iyo la ilaalinayo badqabkeeda**

- Dad ka badan hal milyan ayaa helay iyo lacag loo wareejiyay sannadkii 2024
- Miisaaniyadda 2015 waxay hubineysaa adkeysiga bulshada, iyadoo la isticmaalayo barnaamijka la ballaariyay

**Cimilada, Deegaanka & Aqoonsiga**

- Miisaaniyadda wasaaradda deegaanka iyo isbedelka cimilada: $2.7m.
- Hay'adda Aqoonsiga Qaranka waxay heshay $3.4 dadaalka diiwaangelinta aqoonsiga

## Nooca qeybinta kharashaadka

Qoondooyinka kheyraadka waa tusaale dhexdhexaad ah oo shaqooyinka socda tayadooda hubinaya, iyadoo la taageerayo sida mushaaraadka, barnaamijyada horumarineed kharaashaadka maamulka.

**Qodobbada ugu sarreeyo qoondada ay wasaaradaha iyo hay,adaha**


### 1. Amniga iyo Difaaca:

**Ciidanka Amniga Qaranka $28.5M**

Howlgalka amniga dhanka sirdoonka.

**Ciidanka booliska $49.7M**

Taageeridaa shaqooyinka amniga



**$163.4M Ciidanka milateriga**

Iyadoo la eegayo muhiimadda ay leedaha in la ilaaliyo amniga qaranka iyo la dagaallanka argagixisada


### 2. Kaabayaasha dhaqaalaha iyo Horumarintiisa:

**Wasaaradda Beeraha $57M**

Kor u qaadidda sugnaanta cuntada iyo wax soo saarka beeraha

**Wasaaradda biyaha iyo Tamarta: $92.6M**

Si loo hagaajiyo in la helo biyo nadiif iyo xalalka waara ee Tamarta



**$104.2M Wasaaradda howlaha guud iyo dib u dhiska:**

Mashaariicda taageeraya qorshayaasha iyo bixinta Kaabayaasha kaliya $26.8M ayaa loo qoondeeyay kharashka raasimaalka guud. Kharashaadka soo haro waxaa lagu bixin doonaa kuwa soo noq-noqdo

# Breakdown by Expenditure Type - cont..

## 3. Caafimaadka iyo adeegyada arrimaha bulshada



**$100.5M** **Wasaaradda waxbarashada iyo hiddaha iyo tacliinta sare**

Horimarinta, helitaanka waxbarasho tayo leh iyo kaabayaasha jaamacadaha iyo dugsiyada sare


**$92.6M** **Wasaaradda Caafimaadka**

In la sii wado oo diiradda la saaro caafimaadka hooyada iyo in wax looga qabto cudurrada

**Wasaaradda Shaqada iyo arrimaha bulshada** **$123.9M**

Barnaamijyada ilaalinta bulshada iyo taageerada hab-nololeedka bulshada

## 4. Maamulka iyo isku dubbaridka



**Xafiiska Ra'isulwasaaraha** **$11.4M**

Isku xirka wasaaradaha iyo howlahooda mudnaanta leh

**Xafiiska Madaxweymaha** **$12.5M**

Taageeridda howlaha hoggaanka fulinta guud

**Xafiiska Madaxweynaha iyo Raisulwasaarah**


Wadarta Qoondeynta oo la isku daray **$21.3M**

Si loo taageero hawlaha fulinta sare

**$128.4M** **Wasaaradda Maaliyadda**

Masuuliaydda wasaaradda waa korjoogteynta maamulka Maaliyadda Dadweynaha, abaabulak kheyraadka iyo hubinta maamulka dhaqaalaha

## 5. Qoondeymaha kale oo muhiimka ah



**Hay,adda Aqoonsiga Qaranka** **$3.4M**

Bixinta karaka aqoonsiga qaranka

**Wasaaradda Deegaanka iyo Cimilada** **$2.7M**

Wax ka qabashada cimilada deegaanka

**Wasaaradda kalluumeysiga iyo kheyraadka**

**$16.7M**

Kobcinta warshadaha kalluumeysiga iyo ganacsigiisa

# Horumarinta Qeybta

## Maamulka:

- Qeybta maamulka ayaa muujisay kobaca dakhli ururinta gudaha, iyada oo gaaray koror 12% ah sanadkii 2024 marka loo eegayo 2023.
- Horumar baa laga gaaray xiriirka dowladaha iyo ku-dhaqanka Soomaaliya ee heshiiska EAC.
- Guulaha la taaban karo waxaa ka mid ahaa halbeega IBAN si loo habeeyo lacagaha laga bixiyo xudduudaha, dhisidda hoyga dadka barakacay, iyo billowga bixinta kaararka aqoonsiga qaran si caalamku aqoonsan yahay. Dadaalladan baa ujeedadoodu tahay in la wanaajiyo aqoonsiga, ka hortagga xagjirnimada iyo horumarinta helitaanka adeegyada muhiimka ah.
- Dakhliga gudaha oo kordhay 12% (2024).
- Diiwaangelinta madaniga ah ee horumarsan iyo bixinta aqoonsiga qaranka.

## Amniga:

- Waxaa la sameeyay horumar la taaban karo oo dhanka ammaanka ah, iyadoo ciidamada Soomaaliya ay Alshabaab ka xoreeyeen dhulalka.
- Dawladdu waxay sii waddey ka-qeybgalka bulshooyinka maxalliga ah hindisayaasha ka-hortagga argagixisanimada, kobcinta iskaashiga iyo xasilloonida amniga. Si kastaba ha ahaatee, caqabadaha ayaa weli taagan, taasoo qasabtay dadaallada socda ee qeybta.
- Xasilooni soo hagaagtay, iyadoo meelo laga xoreeyay Al Shabab.
- Iyada oo la wanaajiyey ka qeybgalka maxaliga ah ee dadaallada amniga.

## Adeegyada Bulshada:

- Adeegyada bulshada ayaa horumar laga sameeyay iyadoo la hormariyay daryeelka caafimaadka, gaar ahaan hooyada iyo dhallaanka, oo ay taageerto hawlgelinta Guddiga Qaran ee Daacuunka.
- Helitaanka waxbarashada oo la ballaariyay, iyadoo fasallo la dhisayo iyo dib u habeyn ay maalgelisay Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada.
- Hab-nololeedka in ka badan hal milyan oo qof oo nugul ah ayaa lagu taageeray cunto iyo xawilaad lacageed. Soomaaliya ayaa sidoo kale xoojisay joogitaankeeda ciyaaraha caalamiga ah.
- In xarumaha caafimaadka hooyada lagu qalabeeyo tamarta cadceedda.
- Natiijooyinka sugnaanta cuntada iyo waxbarashada oo sii wanaagsanaada.
- Ku taageerid in ka badan 1 milyan oo qof cunto iyo lacag caddaan ah Fasallo badan oo la dhisay lana dayactiray.

## Qeybta Dhaqaalaha:

- Qeybta dhaqaalaha horumar ayaa laga gaaraysiiba helitaanka korontada, taasoo kor u kacday 40%, iyo sammeynta qiimaha korontada. Horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ayaa sii socday, oo ay ku jiraan dayactirka waddooyinka iyo dayactirka kanaalka waraabka si kor loogu qaado helitaanka biyaha iyo wax soo saarka beeraha.
- Shaqo abuurka waxaa lagu xoojiyay maalgelinta kalluumeysiga iyo MSMEs, halka haqab-beelka cuntadu ay soo hagaagtay iyadoo 20% ay hoos u dhacday tirada dadka haqab-beelka cuntada 2024-ka.
- Helitaanka korontadu waxay kor u kacday 40% (2024).
- Mashaariic lagu dayactirayo waddooyinka oo socda (tusaale, Waddada Gaalkacyo-Xarfo).
- Dib u dayactirka wadada ayaa socota. Tani waxay u baahan tahay in ay ka muuqato qoraalka. Ka tagista wax bey u dhimmi kartaa daacadnimada macluumaadka ku jira wargelinta.
- Kanaalka waraabka oo la hagaajiyay iyo helitaanka biyaha.
- Shaqo abuurka kalluumeysiga iyo MSMEs.
- Helitaanka korontada ee dadku waxa uu kordhay ku dhawaad 40% 2024 marka la barbar dhigo 35% 2020. Hadda hal unug oo koronto ah ayaa ku kacaya inta u dhaxaysa $0.45 ilaa $1.

## Hindisaha qorsheysan sannadka 2025

01 Ilaalinta kheyraadka badda iyo kobcinta wax-soo saarka beeraha

02 Kor u qaadidda kaabayaasha dhismaha iyo kor u qaadidda tamarta

03 Horumarinta ganacsiga gobolka oo la raacayo heshiisyadii EAC


04 Taageerada dib u dhiska iyo in laga shaqeeyo dib u dejinta qaxootiga

**Dulmarid kooban ee 2025:** Miisaaniyadda Soomaaliya ee 2025 waxaa ka muuqda sida ay dowladda uga go,antahay xasilloonida,kobaca iyo horumarinta bulshada guud. Waxaana diirradda la saarayaa in laga faa,iideysto hufnaanta hantida dadweynaha. Qorshahaan ayaa ah in la hirgeliyo dhaqaale ku dhisan adkeysi iyo in kor loo qaado tayada nolosha shacabka Soomaaliyeed.

## Natiijada ugu muhiimsan oo la qaadanayo

In la ballaariyo adeegyada bulshada: Waa in xoogga la saaro, caafimaadka, waxbarashada iyo in la ilaaliyo shacabka nugul, hirgelintiisana waa socotaa

Ballaarinta adeegyada bulshada: Waa in xoogga la saaro waxbarashada, caafimaadka iyo la ilaaliyo shacabka nugul, iyo tayeynta federaalka oo ay dib u habeyntiisa socoto hadda



Markasta amniga waa mudnaanta kowaad: Ku dhawaad miisaaniyadda shan meelood mid kamid ah waxaa lagu bixiyaa difaaca iyo amniga

Kobaca dakhliga gudaha: waxaa la saadaalinayaa in canshuurta dakhliga 20% kor u kacdo, iyadoo taasi keentay dib u habeynta aruurinta canshuurta oo si sax ah loo maareeyay

In dib loo habeeyo dhaqaalaha iyo soo kabashada: Deynta dowladda waxay hoos u dhacday kaddib(HIPC) deyn cafintii, Soomaaliya ka shaqeyneysaa horumar waara oo salkiisu adagyhaya

Deeqbixiye in lagu tiirsanaado oo wali kor ah: Deeqda dibedda waxay ku dhawaad tahay 68% dakhliga 2025. Soomaaliya waa in ay dakhli kale hesho ay hoos ugu dhigto baahida miisaaniyadda dibedda.

# Mashaariicda kale oo horumarineed ee la qorsheeya

WORLD BANK GROUP

- Hadda socda- Bangiga Adduunka – Mashruuca kaalmada awoodda.
- Hadda socda- Bangiga Adduunka – Mashruuca kharashaadka soo noq-noqdo iyo maalgelinta dib u habeynta.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca adkeysiga deegaamaha.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca adkeysiga deegaamaha iyo maalgelin dheeraad ah.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca dib u hagaajinta koronta Soomaaliyeed.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashrruuca horumarinta iyo kor u qaadista.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca Badbaadada bulshada soomaaliyeed.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca tirakoobka siyo tayeynta Soomaaliyeed.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca waxbarshada Soomaaliyeed iyo xoogga-maalka
- Hadda socda- Bangiga Adduunka – Mashruuca is dhexgalka dhaqaalaha ee geedka Afrika (SHIIP).
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashruuca ka hortagga ayaxa iyo jawaabta degdeg ah.
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashrruuca biyo celinta reer miyiga ee Biyoole 2
- Hadda socda- Bangiga Adduunka – Mashrruuca is dhexgalka ee digital ka ee gobolka Afrika
- Hadda socda- - Bangiga Adduunka – Mashrruca nidaamyada cuntada Soomaaliyeed

United Nations

- Hadda socdo – Qaramada midoobay – Sanduuqa dhismaha nabadda (SFF).
- Hadda socdo - Qaramada midoobay Mashruuca degmooyinka ugu badan qoodeyntooda (GPE-MCA)
- Hadda socdo - Qaramada midoobay – Iskaashiga Caalamiga ee Waxbarashada

AFRICAN DEVELOPMENT BANK GROUP
GROUPE DE LA BANQUE AFRICAINE DE DEVELOPPEMENT

- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika - Maamulka iyo Maaliyadda dhaqaalah.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika - Mashruuca kaabayaasha iyo dhismaha waddooyinka.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika – SIEMID.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika - Mashruuca korontada.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika – Mashruuca adkeynta isla xisaabtanka iyo maamulka deynta ee hufan (SADMS).
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika – Taagerada mashruuca horumarinta tirokoobka Soomaaliyeed.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika – Barnaamijka qaabeynta cuntada iyo ilaalinta nafaqada ee geeska Afrika.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika – Tiknoolajiyada.
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika - Barnaamij leh tayo Farsamo shaqo lagu heli karo, wax soo saar loo wada dhanyahay .
- Hadda socdo - Bangiga Horumarinta Afrika - Mashruuca Taageerada hay,adaha maaliyadda iyo maareyntooda

EU Somalia

- Hadda socdo – Mashruuca Sagal
- Hadda socdo – Xoojinta iyo tababarka ee mashruuca waxbarashada ee Soomaaliya
- Hadda socdo – Deeqaha nidaamka sare waxbarasha caalamiga (GPE –SCG)
- Hadda socdo – Mashruuca dardar-gelinta gabdhaha GPE GEA).
- Hadda socdo - GPE - Dib u habeynta wadiiqooyinka deeqaha (STG).

Waxaa si hufan ku soo dhaweyneynaa su'aalaha, ra'yi celinta iyo talooyinka ku saabsan miisaaniyadda dadweynaha- fadlan kala xirriira farriinta gaaban 7575 ama teleefanka tooska si loo helo la xisaabtan iyo horumar daah-furan








**Ministry of Finance**
**Corso Somalia Street,**
**Shangaani District**
**Mogadishu, Somalia**
**https://mof.gov.so/**